



2021

Codsadaha Qaaliga ah ee Rent Assistance,

STEP waxay fahamsan tahay in dhibaataada dhaqaale ay welwel weyn kugu hayso. Waxaan ku dedaali doonaa inaanu uga jawaabno codsigaaga si dhakhso ah. Waxaad gacan ka geysan kartaa in hanaanka codsiga uu si hufan u socdo adigoo buuxinaya codsiga soona gudbinaya dhammaan dukumiintiyada la codsaday isla hal mar. Cadeynta ayaa loo baahan yahay si loo go'aamiyo u-qalmitaanka iyo ilaha maalgelinta ee loo heli karo xaaladdaada. Waa muhiim in lagaga jawaabo su'aal kasta sharraxaad dhameystiran oo laga saxeexo codsiga halka loogu talagalay. Dhammaan codsadyaashu ma helayaan kaalmo; si kastaba ha noqotee, STEP waxay ku dedaali doontaa inay wax kaga qabato codsigaaga kheyraadka STEP ama u gudbinta ururada kale.

Waqtigan STEP kaama rabto inaad codsato kaalmada kirada ee Hennepin County ilaa aan go'aansanno inaad u qalmin kaalmada STEP ama ay STEP u baahato inay la shaqeyso Gobolka si loo xalliyo xaaladdaada mooyee. Tan waxaa lagu go'aamin doonaa calaa kiis.

STEP waxay u baahan doontaa in codsadu uu u adeegsado dhammaan dakhliga qoyska si uu u xaliyo dhibaataada kirada. Tan waxaa ku jiri doona jeega kaalmada dhaqaale xumada, gunnada shaqo la'aanta, cashuur celinta, sooshiyal sikiyuurati, masruufka carruurta, iyo dheefaha kale ee lacageed ee dowlada. STEP waxay kaa codsan doontaa inaad soo gudbiso qorshaha sida aad kirada isaga bixin doonto.

STEP kama caawiso dadka u guuraya St. Louis Park, debaajiga ama kirada bisha koowaad. Haddii aad tahay qof cusub oo degan St. Louis Park, deebaajigaaga iyo kiradaada bisha koowaad waa in loo bixiyaa si buuxda kahor intaadan codsan kaalmada. Waa inaad haysataa heshiis kiro oo sharci ah si aad ugu qalanto maalgelinta.

Haddii mulkiilahaagu kuugu hanjabo inuu fayl garaynaayo ka saarida guriga ama uu kaa codsado inaad ka guurto gurigaaga iyadoo aanay jirin tallaabo maxkamadeed fadlan kala xiriir Khadka HOME 612-728-5767.

Ugu dambeyntii, haddii aad tahay qof hela kaalmada guryeynta fadlan la xiriir St. Louis Park Housing Authority ama hay'ad kale oo mas'uul ka ah kaalmada si ay u qaadaan tallaabooyinka kiradaada lagu dhimayo. St. Louis Park Housing Authority waxay ka tanaasulaysaa khidmadaha daahitaanka waxaanay aqbali doonaan inay qofku is-caddeeyo halkii ay qolo 3-aad ka xaqiijin lahayd luminta dakhliga iyadoo fahamka tani uu yahay in loo baahan doono mar dambe. Fadlan si wakhtiga ku haboon dabagal u samee oo weydii haddii duruufaha la xiriira COVID-19 la tixgelin karo xaaladaada. Codsadeyaasha kirada Rent Assistance ee hela kaalmada guryeyntu waxay STEP siisaa mudnaanta ugu yar.

Waad ku mahadsan tahay taageerada aad bixisay ee ka shaqeynta codsigaaga sida ugu dhakhsaha badan ee suurogalka ah. Waxaan rajeyneynaa inaanu kula shaqeyno.

Si daacadnimo ah,

Julie Lapointe, LISW, Maareeyaha Barnaamijka STEP

# Arjiga Kaalmada Dhaqaale ee Degdegga ah ee STEP

Fadlan ka jawaab dhammaan su'aalaha ku yaala arjigan oo soo gudbi dhammaan dukumiintiyada loo baahan yahay. Codsiyada aan dhameystirnayn lama tixgelin doono ama waxay qaadan karaan waqti badan in laga shaqeeyo.

Fadlan soo raaci waxyaabahan soo socda arjigaaga:

- Caddeynta dakhliga biishii ugu dambeysay ee DHAMMAAN xubnaha qoyska (tani waxay noqon kartaa jeegagga mushaharka, jeegaga gargaarka federaalka, warqadda dheefaha shaqo la'aanta, warqada siinta soshiyal sikiyuurati, caddeynta MFIP, Masruufka Ilmaha, iwm.). Fadlan ku dar caddeynta dhammaan ilaha dakhliga.
- Warqad ka timid mulkiilaha gurigaaga oo sheegeysa inaad la daahday kiradaada. Waraaqdan waa in lagu taarikheeyaa isla bisha aad codsanayso gargaarka. Sidoo kale, waa inaad ku darto macluumaadka mulkiilaha gurigaaga (cinwaanka, lambarka taleefanka, lambarka fakiska, iwm.). Haddii aad u dalbanaysid gargaar sababo la xiriira COVID 19, waa inaad bixisay kiradaada ilaa iyo Maarso 31, 2020.
- Kirada hadda.
- Caddeynta dhibaataada. Waa inaad caddeysaa sababta aanad u bixin kiradaada. Caddeynta waxaa kamid noqon kara:
  - ✓ Rasiidhada caafimaadka
  - ✓ Caddeynta dakhliga lumay
  - ✓ Caddeynta kharashyada dheeriga ah
  - ✓ Shaqo luminta la xiriirta COVID 19 (is-sheegid leh taariikhda shaqo luminta iyo/ama xaqiijinta arjiga shaqo la'aanta)
- Caddeynta sida dakhligaagu u kordhi doono si aad isaga bixin karto kiradaada kadib markii ay STEP ku caawiso.
  - ✓ Caddeynta shaqada cusub (oo ay ku jirto mushaharka/saacadaha)
  - ✓ Caddeynta awooda aad ugu laaban karto shaqada (qoraal dhakhtareed)
  - ✓ Caddeynta korodhka mushaharka ama dheefaha cusub ee degmada.
  - ✓ Warqada siinta shaqo la'aanta - COVID 19
  - ✓ Caddeynta dhimista kirada ee ay bixisay Housing Authority ama hay'ad kale
- Dukumiinti kasta oo kale oo uu codsado shaqaalaha bulshada ee STEP:  

---

- Waxaan kaa codsanaynaa inaad na siiso **nuqulada** Dukumentiiyadan. **Ha na siinin dukumiintiyada asliga ah ee aad dib ugu baahan tahay.** Ma dammaanad qaadi karno in shay kasta oo aad soo gudbiso dib laguugu soo celin doono.

Waad ku mahadsan tahay arjigaaga. Codsiyada waxaa looga shaqeyn doonaa sida ugu dhaqsaha badan ee suurogalka ah, laakiin waxay qaadan kartaa ilaa 10 maalmood in STEP laga helo jawaab ku saabsan xaaladda arjigaaga. Shaqaalaha bulshada ee STEP ayaa kuula soo xiriiri doona sida ugu dhaqsaha badan si ay kaagala hadlaan arjigaaga iyo/ama wixii su aalo ah ee soo baxa.

**\*\*Fadlan rog boggan si aad u saxeexdid bayaanka arrimaha khaaska ah ee kuu sheegaya sida macluumaadkaaga loo adeegsan doono. Mahadsanid.\*\***

# Xuquuqaha Xogta Arrimaha Khaaska ah ee u Khuseeya Arjiga Gargaarka Degdegga ah

Waxaad leedahay xuquuq hoos timaada **Xeerka Dhaqanada Xogta ee Dowladda Minnesota**. Xeerkani wuxuu ilaaliyaa arrimahaaga khaaska ah, laakiin sidoo kale wuxuu noo oggolaanayaa inaan macluumaadka kugu saabsan siino dadka kale haddii uu sharcigu u baahdo WAANAN kuu sheegi doonaa kahor intaan sidan samayn.

- Waxaan kaa codsaneynaa macluumaadkan si aan u awoodno:
  - Inaan kaa dhex garano dadka kale ee kula magaca ah
  - Inaan go'aan ka gaarno haddii aad adeegyo naga heli karto iyo waxa ama xaddiga aad heli karto
  - Inaan u warbixino dowladda ama ilaha kale ee maalgelinta si aan u sii wadno bixinta adeegyadan (ma jiraan macluumaad aqoonsi ah oo adiga kugu saabsan oo lala wadaago hay'adahan iyadoon la heysan oggolaanshahaaga).
- Guud ahaan, lagaagama baahna inaad na siiso macluumaadka. Si kastaba ha noqotee, haddii aadan na siin macluumaadka, waxaa suuragal ah inaanu go'aansan kari weyno haddii aan ku caawin karno.
- Waxaad xaq u leedahay inaad hesho nuqulka macluumaadka aan kaa hayno. Haddii aadan fahmin macluumaadka, waxaa suuragal ah in lagu sharaxo. Haddii aadan u maleynaynin in macluumaadku uu sax yahay ama dhammeystiran yahay, waxaad ku diidi kartaa qoraal ahaan adigoo u diraya agaasimaha shelefka cuntada. Macluumaad dheeri ah oo ku saabsan sida loo sameeyo tan, weydii shaqaalaha kula shaqeynaya.
- Waxaad fahantay inay jiraan waxyaabo ka reeban sir ahaanshaha oo ay ku jiraan waxyaabahan soo socda:
  - Macluumaadka waajibinaya in loo warbixiyo Child or Adult Protection
  - Macluumaadka ayaa la sii dayn karaa si loo ilaaliyo caafimaadka iyo badbaadada dadka kale ama naftaadaba
  - Faylkaaga ay maxkamadi codsato

Taariikhda Saxeexa

---

Magaca Qoraalka ah

---



## ARJIGA GARGAARKA DEGDEGGA AH

Arjigan waxaa loogu talagalay in lagu baadho codsadayaasha Gargaarka Degdegga ah ee kirada ama deynta iyada oo loo marayo Barnaamijka Gargaarka Degdegga ah ee St. Louis Park mana laha dammaanad qaadida gargaarka. Fadlan uga jawaab su'aalaha si dhameystiran lana fahmi karo. Adeegso **khad buluug ama madow ah oo kaliya**.

Taariikhda Maanta: \_\_\_/\_\_\_/\_\_\_

Magaca: \_\_\_\_\_ Taariikhda Dhalashada: \_\_\_/\_\_\_/\_\_\_

Cinwaanka: \_\_\_\_\_ # Taleefanka: \_\_\_\_\_

### Qor **DHAMMAAN** xubnaha kale ee reerka:

Magaca Hore	Magaca Dambe	Waxa aad isu tihiin	Taariikhda Dhalashada:

*\*Ku qor xubnaha reerka ee kale warqad gaar ah*

- Gargaarka Degdegga ah ma ka heshay STEP 12-kii bilood ee la soo dhaafay? Haa Maya
- Miyaad bishan codsatay Gargaarka Degdegga ee Hennepin County? Haa Maya
- Muddo intee le'eg ayaad ku noolayd gurigaaga hadda? \_\_\_\_\_ sannadood \_\_\_\_\_ bilood
- Yaa bixiyay kiradaada:  
Bishii la soo dhaafay? \_\_\_\_\_ Bishii ka horeysay bishii la soo dhaafay? \_\_\_\_\_ 3 bilood kahor? \_\_\_\_\_

### **Dakhliga Bil-laha ah (ee DHAMMAAN xubnaha qoyska):**

Shaqada: \$MFIP: \$SSI /Soshiyal Sikiyuuriti: \$

Masruufka Carruurta: \$Lacagta dadka shaqada laga joojiyay/howlgabka: \$Mid Kale: \$

### **Miyaad heshaa waxyaabaha soo socda?**

Kaalmada Cunnada: \$ \_\_\_\_\_ WIC/MAC: Haa Maya

(Ka sii wad dhanka dambe)

**Immisa ayaad ku bixisaa bil kasta waxyaabaha soo socda?**

Kirada/Deynta: \$ \_\_\_\_\_ Korontada: \$ \_\_\_\_\_ Gaasta: \$ \_\_\_\_\_ Taleefanka: \$ \_\_\_\_\_  
Raashinka: \$ \_\_\_\_\_ Xannaano-maalmeeda: \$ \_\_\_\_\_ Bixinta Lacagta Gaariga/Ceymiska Gaariga: \$ \_\_\_\_\_ \$ \_\_\_\_\_  
Gaasta/Baska: \$ \_\_\_\_\_ Amaahda Ardayda: \$ \_\_\_\_\_ Mid Kale (fadlan sheeg): \$ \_\_\_\_\_

**Macluumaadka Kirada:**

**Macluumaadka Mulkiilaha Guriga/Shirkadda Maamulka/Shirkadda Amaahda:**

Magaca: \_\_\_\_\_

# Taleefanka: \_\_\_\_\_ # Fakiska: \_\_\_\_\_

Imeyl: \_\_\_\_\_

- Kirada (bilahee) ayaa lagugu leeyahay (tusaale Jan., Feb, iwm)?
- Kiro intee le'eg ayaa lagugu leeyahay? \$Waa immisa khidmadaha daahitaanka ee lagugu leeyahay? \$ \_\_\_\_\_
- Ma heshaa kaalmada kirada?Haa Maya \_\_\_\_\_ Haddii ay haa tahay, waa immisa? \$ \_\_\_\_\_
- Ma leedahay wax UD ah taariikhaada kirada?Haa Maya \_\_\_\_\_ Haddii ay haa tahay, waa immisa? \_\_\_\_\_

**Miyaad lumisay dakhli 30-kii maalmood ee la soo dhaafay (luminta shaqada/saacadaha, caafimaad, iwm)? Haa Maya  
Fadlan si kooban u sharax:**

---

---

---

---

**Miyaad lumisay dakhli 60-kii maalmood ee la soo dhaafay (luminta shaqada/saacadaha, caafimaadka, iwm)? Haa Maya  
Fadlan si kooban u sharax:**

---

---

---

---

**Muxuu yahay qorshahaaga aad ku bixinayso kiradaada bisha soo socota haddii aad bishan caawimo ka hesho STEP?  
*\*Fadlan ku dar caddeyn taageeraysa qorshahaaga inaad kiradaada bixiso mustaqbalka.***

---

---

---

---

(Fadlan ka sii wad dhanka dambe)

## Foomka Tirakoobka ee STEP

*Buuxinta foomkani waa ikhtiyaari, macluumaadka aad na siineysoona ma saameyn doono adeegyada aad ka hesho STEP. Macluumaadkaan waxaa loo isticmaalaa ujeedooyin warbixineed oo keliya. Macluumaadka aqoonsiga ee ku saabsan adiga ama qoyskaaga lalama wadaagi doono qof ka baxsan STEP.*

Madaxa reerka (magaca hore iyo kan dambe):

Ma qoyskaaga haweeney madax u ah (ma jiraan rag waaweyn oo reerka ka tirsan)? Haa  Maya

Qoyskaagu ma Hisbaanik baa? Haa  Maya

<p><b>Waxaan isu-aqoonsanay isir(kan/adan) soo socda - cCalaamadi dhammaan kuwa khuseeya:</b></p> <p><input type="checkbox"/> Caddaan  <input type="checkbox"/> Madaw/Afrikaan Ameerikaan  <input type="checkbox"/> Hindida Mareykanka/Dhaladka Alaska  <input type="checkbox"/> Aasiyaan  <input type="checkbox"/> Afrikaan  <input type="checkbox"/> Dhaladka Haawaay/Jasiiradaha Kale ee Baasifigga</p> <p><b>Dadka waaweyn ee kale ee reerkaygu waa isir(kan/adan) soo socda - calaamadee dhammaan kuwa khuseysa</b></p> <p><input type="checkbox"/> Caddaan  <input type="checkbox"/> Madaw/Afrikaan Ameerikaan  <input type="checkbox"/> Hindida Mareykanka/Dhaladka Alaska  <input type="checkbox"/> Aasiyaan  <input type="checkbox"/> Afrikaan  <input type="checkbox"/> Dhaladka Haawaay/Jasiiradaha Kale ee Baasifigga</p> <p><b>Ilmaha/carruurta reerkaygu waa isir(kan/adan) soo socda - calaamadee dhammaan kuwa khuseysa</b></p> <p><input type="checkbox"/> Caddaan  <input type="checkbox"/> Madaw/Afrikaan Ameerikaan  <input type="checkbox"/> Hindida Mareykanka/Dhaladka Alaska  <input type="checkbox"/> Aasiyaan  <input type="checkbox"/> Afrikaan  <input type="checkbox"/> Dhaladka Haawaay/Jasiiradaha Kale ee Baasifigga</p>	<p><b>Waxaan ahay jinsigan soo socda – calaamadee dhammaan kuwa khuseeya:</b></p> <p><input type="checkbox"/> Dheddig  <input type="checkbox"/> Lab  <input type="checkbox"/> Labeeb  <input type="checkbox"/> Mid kale  <input type="checkbox"/> Lama yaqaan</p> <p><b>Dadka waaweyn ee kale ee reerkaygu waa jinsi(gan/yadan) soo socda - calaamadee dhammaan kuwa khuseysa</b></p> <p><input type="checkbox"/> Dheddig  <input type="checkbox"/> Lab  <input type="checkbox"/> Labeeb  <input type="checkbox"/> Mid kale  <input type="checkbox"/> Lama yaqaan</p> <p><b>Ilmaha/carruurta reerkaygu waa jinsi(gan/yadan) soo socda - calaamadi dhammaan kuwa khuseeya:</b></p> <p><input type="checkbox"/> Dheddig  <input type="checkbox"/> Lab  <input type="checkbox"/> Labeeb  <input type="checkbox"/> Mid kale  <input type="checkbox"/> Lama yaqaan</p>
--	---

**Fadlan calaamadi dakhliga guud\* ee bishii ee reerkaaga (ku dar dhammaan ilaha dakhliga):**

Baaxada Reerka	Calaamadee khaanadda dhanka bidix ka xigta qadarka khuseeya baaxada reerkaaga			
	Ka hooseeya FPL	100% FPL	156% FPL	200% FPL
<b>1</b>	ka hooseeya \$1041	\$1041 - \$1,623	\$1,625 - \$2,081	\$2,082 ama ka badan
<b>2</b>	ka hooseeya \$1409	\$1,409 - \$2,197	\$2,198 - \$2,817	\$2,818 ama ka badan
<b>3</b>	ka hooseeya \$1778	\$1,778 - \$2,772	\$2,773 - \$3,554	\$3,555 ama ka badan
<b>4</b>	ka hooseeya \$2146	\$2,146 - \$3,347	\$3,348 - \$4,291	\$4,292 ama ka badan
<b>5</b>	ka hooseeya \$2514	\$2,514 - \$3,921	\$3,922 - \$5,027	\$5,028 ama ka badan
<b>6</b>	ka hooseeya \$2883	\$2,883 - \$4,496	\$4,497 - \$5,764	\$5,765 ama ka badan
<b>7</b>	ka hooseeya \$3251	\$3,251 - \$5,070	\$5,071 - \$6,501	\$6,502 ama ka badan
<b>8</b>	ka hooseeya \$3619	\$3,619 - \$5,645	\$5,646 - \$7,237	\$7,238 ama ka badan

\*Dakhliga guud waa dakhliga ka hor cashuuraha



## Bixinta xogta

Waxaad leedahay xuquuqda hoos timaada Xeerka Dhaqanada Xogta ee Dowladda Minnesota. Xeerkani wuxuu ilaaliyaa arrimahaaga khaaska ah, laakiin sidoo kale wuxuu noo oggolaanayaa inaan macluumaadka kugu saabsan siino dadka kale ee ku xusan foomkan HADDII aad aqbasho.

Waan u fasaxay **Barnaamijka Degdegga ee St. Louis Park** (STEP) inay bixiso iyo/ama hesho macluumaadkan soo socda: Magacayga, tirakoobka reerka iyo macluumaadka dakhliga guud.

Waxaan fahamsanahay in macluumaadka la siin karo ilaha maalgeliya gargaarka kirada ee dowladda ee ay ku jirto Hennepin County ee maalgelinta CDBG.

Macluumaadkan waxa loo adeegsan doonaa si ay iiga caawiso kirada gurigeyga iyo si ay STEP u hesho maalgelinta loo baahan yahay in lagu bixiyo kirada dadka degan St. Louis Park.

Waxaan fahamsanahay inaan la iiga baahnayn inaan bixiyo macluumaadkan. Si kastaba ha noqotee, haddaan bixin macluumaadkan, suurogal uma noqonayso hay'addaha i caawinaya inay i siiyaan ama ii helaan gargaar.

### Akhri oo Saxeex:

Waxaan caddeyneynaa in macluumaadka aan ku soo gudbiyay foomkan uu yahay mid sax ah oo dhameystiran. Waxaan fahamsanahay in bixinta macluumaadka beenta ah ay tahay khiyaano, waxayna sababi kartaa laalidda codsigan. Waxaan u fasaxay STEP inay kala xiriirto mulkiilaha gurigeyga/shirkadda maamulka/ shirkadda deynta wax ku saabsan codsigan. Waxaan u fasaxay STEP inay siiso macluumaadka deeq-bixiyeyaasha maadaama ay tahay shuruuda maalgelinta ay siiso hay'addan.

Waxa Xaxeexay Ka Qeybqaataha (madaxa reerka ama mas'uulka):

\_\_\_\_\_

Taariikhda: \_\_\_\_\_